TRAFIKVERKET

# Amaanka gaariga

## – sidaan ayaad u ilaalineysaa naftaada iyo ilmahaaga

Information på somaliska



# Amaanadaada awgeed

Qoraalkan waxaad ka heleysaa warbixin ku saabsan sidi aad kor ugu qaadi laheyd amaanada gudaha gaariga. Waxaa halkan ku yaal sidi ilmahaagu nabad ugu raaci lahaa gaariga, iyo sida aad adiga hoos ugu dhigi laheyd qatarta ka iman karta dhaawac ku soo gaara.

## Amaanada marka gawaari isku dhacaan

Sida gaarigu uga bixi karo shil gaari kale ee ku dhacay waxey bixisaa arin ku saabsan sida gaarigaa kuu badbaadin karo. Markaa waxa la isticmaalaa habab kala duwan si loo ogaado sida gaarigu u yahay amaano dhinaca isku dhaca si kadibna dadka macaamilka loo wargeliyo. Iswiidhen waxa warbixinta isku dhaca gawaarida iyo amaanadoodu ay ka timaad laba il – Euro NCAP iyo Folksam.

## Dhaawaca qoorta marka shil dhaco waa dhaawaca ugu badan

Sanad kasta dad iswiidhish ah oo gaaraya 20 000 ayaa waxa soo gaara dhawaca qoorta shil dartii (whiplash). Sababta ugu weyn ee keenta dhaawacaa qoorta waa gaariga aad saaran tahay oo gadaal looga dhaco. Waxaa kaloo dhaawacaa keena isku dhaca dhinaca hore, shilka aad kaliga ku tahay iyo mararka qaar meel ka baxsan goobaha gaadiidka. Sida ugu wanaagsan ee looga hortagi karo dhaawac weyn ee qoorta ah waa adigoo doorta gaari ku siinaya difaac aad u wanaagsan. Barkinta isku dhaca ee shilka, taageerada madaxa iyo sida kursigu u yaal ayaa muhim u ah si aad isaga difaacdo dhaawaca qoorta.

## Hubinta xamuulka

Marka gawaari isku dhacaan ama xoog loo qabto fariin waxa quwad aad u weyn ku duula dhamaan waxyaabaha aan meel ku xirneyn. Dadka waxa meeshooda ku haya suunka kursiga xamuulkuna wuxuu ku haboon yahay inuu ku xiran yahay meesha gadaal ee gaariga. Xamuulka dhig meel aad u hooseysa sidi suura gal ah, gali meesha danbe ee gaariga ama bir xarig ah oo ku xiran gaariga ka daba mari. Isticmaal birta celisa xamuulka ama bir kale oo lagu xiro. Waligaa alaab culus ha u deyn ineysan meel ku xirneyn gaariga ah, isticmaal suumanka si aad u sugto amaanada alaabta kursiga danbe aan dhigeyso.

## Ku fikir inaad difaacdo qoorta

- Toosi difaaca dhabarka.
- Toosi taageerada madaxa si madaxa oo dhan u helo taageero. Taageerada madaxa waa iney gaartaa madaxa oo dhan.
- Fariiso meel u dhow taageerada dhabarka iyo tan madaxa.
- Wax badan ka fogaaw gaariga kaa horeeya.
- Haddii aad muraayada gadaal ka aragto in gadaal lagaaga dhici rabo madaxaaga ku dheji taageerada madaxa oo ha leeleexin madaxaada.



# Shilka afka hore ee gaariga adigoo ku socda 90 kiiloomitir saacaddi waxey la mid tahay adigoo ka dhaca dabaqa tobnaad

Qatarta ka imaan karta inaad gaari xoog u wado waxey la mid tahay adigoo buur ka dhaca ama guri dabaq ah. Laakin xowliga gaariga uma aragno wax qatar keeni kara. Wey noo muuqataa qatarta ka imaaneysa marka buur aan ka soo dhacdo laakin ma aragno qatarta ku jirta inaad shil gasho adigoo ku socda sagaashan kiilomitir saacaddi.

### Xowliga ayuu ku xiran yahay dhaawaca iman kara

Xowliga gaariga ku socdo marka uu shilka galayo ayey ku xiran tahay dhaawac intee ah ee ku soo gaari kara markaad shil gasho. Xowliga badan mida kale waa kan sababa in sideedaba uu shil dhaco.

### Xowliga badan wuxuu keenayaa iney dheeraato istaajinta gaariga

Markaad kordhiso xowliga gaariga, waxaa dheeraada inta ay kugu qaadan karto istaajinta gaariga. Istaajinta gaariga waxa loo qeybiyaa xariijinta ficil-celinta iyo tan fariinka. Xariijinta ficil-celinta waa inta ay kugu qaadato ilbiriqsiga aad ficil-celinta ku sameyn karto. Tan istaajinta waa inta gaariga gaaro marka laga bilaabo markaad fariinka qabato ilaa iyo marka gaarigu ka istaago.

### Suunka waa mid muhim u ah badbaadida

Iswiidhen waa sharci in suunka gaariga la xirto. Suunka gaariga waa waxa ugu muhimsan ee gaarigu leeyahay ee ku badbaadin kara – kursiga hore iyo kan danbaba. Haddii dadka oo dhan isticmaali lahaayeen suunka qiyaastii 80 naf ayaa sanad kasta ku badbaadi laheyd gaadiidka Iswiidhen. Markaad isticmaasho suunka waxaad bar ka dhigeysaa qatarta aad ugu jirto inaad ku dhimato ama si xun ugu dhaawacanto shilka gawaari isku dhacda.

### Dhaawac weyn xataa xowliga yar

Suun la'an waxaad shik ku badbaadeysaa markaad ku socoto xowli ah 7 kiilomitir saacada haddii aad nasiib leedahay, waana haddii aad diyaar u aheyd isku dhaca aadna tahay qof dhisan oo is celin kara. Xowligu markuu gaaro 50 kiilomitir saacaddi xoog weyn ayaad kula dhaceysaa isteeriga, muraayada ama qeybaha kale ee gaariga haddii aadan xirneyn suun.

### Rakaabku waa cuslaadaa marka gawaari isku dhacaan

Rakaabka fadhiya kursiga danbe waa inuu xirtaa suunka. Qofka aan xirneyn suunka marka gawaari isku dhacdo waxa u qofkaa u soo duulayaa horey si xoog badan taasoo keeni karta inuu dilo qofka fadhiya kursiga hore.

# Barkinta shilka waa qeyb ka mid ah nidaamka badbaadada

Barkimaha shilka iyo suunkuba waa nimaad badbaado wanaagsan oo gaariga waana in aad markasta isticmaashaa suunka gaariga si aad u hesho badbaadada saxda ee barkinta shilku ku siineyso. Qatarta ugu weyn marka aad gasho shil dhinaca hore ah waa madaxa ama bogga in aad ku dhufsato qalabka gaariga tusaale ahaan isteeriga, qalabka ka danbeeya, muraayada hore ama biraha dhinacyada. Markaad isticmaasho suunka gaariga waxaad si weyn hoos u dhigeysaa qatarta dhaawaca. Markaad isticmaasho barkinta shilka waxaa haddana hoos u sii dhacaya qatarka.

### Barkimaha dhinaca ah ma aha kuwo qatar keenaya

Gawaari badan ayaa leh barkimaha shilka oo ku xiran gaariga gudihiisa. Wey yartahay qatarta u iman karta ilmo yar oo si sax ah ugu fadhiya difaaca caruurta ama kursiga caruurta ee sii jeeda taasoo uga iman karta barkimaha dhinacyada.

### Shaqada ka saar barkinta shilka ee booska rakaabka

Barkinta shilka ee booska rakaabka waxey adkeyneysaa isticmaalka kurisga hore ee caruurta isticmaaleysa kursiga sii jeeda ee caruurta. Si aadan uga baxsato dhibka waa in aad shaqada ka saartaa barkinta shilka ee booska rakaabka, ama aad hubisaa in caruurta ama qofka qaan gaarka ee aad u gaaban uu mar walba fariisto kuraasta danbe. Soo saarayaasha gawaarida ayaa isticmaala nidaam farsamo kala duwan si howsha looga saaro barkinta shilka ee booska rakaabka. U gee gaariga garaash ku takhasusay gawaarida noocaa ah si uu barkinta uga saaro shaqada haddii gaarigaadu aanu aheyn mid aad adigu barkinta shaqada uga saari karto adigoo isticmaalaya furaha gaariga. Gawaarida qaar barkinta lagama dhigi karo mid aan shaqeyneyn.

### Calaamada digniinta

Gawaariga ku leh barkinta shilka booska rakaabka waa in ey lee yihiin calaamad digniin si toos ah kuugu sheegaysa markaad rabto in aad meeshaa ku xirto ama u isticmaasho kursiga caruurta ee gawaarida. Haddii calaamadaa ka maqan tahay gaariga, waxaad taa ka heli iibiyaha ku takhasusay gawaarida noocan ah ama goobta kuugu sokeysa ee lagu imtixaano gawaarida (Svensk Bilprovning).




WARNING
VARNING
ADVARSEL
ADVARSEL
VAROITUS

# Caruurtu waxey u baahan yihiin difaac ka badan kan dadka waaweyn

Fariin xoog loo qabto iyo isku dhac adigoo ku socda 40 kiilomitir saacadi. Intaas ayaa keeni karta in caruurtu dhaawac soo gaaro marka ay saaran yihiin gaari. Sanad kasta caruur ayaa dhimata ama dhaawacanta sababtoo ah iyadoon suunka gaariga ama difaaca kale ee caruurta loo isticmaalin si sax ah.

### Qofka yar wuxuu u baahan yahay difaac saa'id ah

Madaxa ilmaha ayaa ka weyn kana culus marka loo eego jirka intiisa kale qoortuna si wanaagsan uma dhisna. Marka gaari shil galo waxa madaxa caruurta u duulaa horey iyo gadaal isagoo xoog weyn ku socda. Si ilmuhu uga badbaadi dhibka uga iman kara taa wuxuu u baahan yahay difaac saa'id ah.

Dhaqaatiirka iyo cilmi baarayaashuba waxey ku taliyaan il ilmuhu isticmaalo kursiga suunka ama barkinta suunka ilaa inta da'doodu ka gaareyso 10-12 sano. Sida sharcigu qabo waa in caruurta ka gaaban 135 sintimitir ay isticmaalaan difaac gooni ah, oo loola jeedo difaaca caruurta (babyskydd), kuraasta caruurta ee gaariga, kursiga suunka ama barkinta suunka.

### Dib u sii jeedinta ayaa ugu wanaagsan

Ilaa iyo caruurta afar jirka ah waxa ugu badbaado badan iney raacaan gaariga iyagoo sii jeeda. Kursiga sii jeeda ayaa xoogu ku dhacayaa isagoo difaacaya meelaha qatarta badan ka soo gaari karto caruurta sida madaxa iyo cunaha. Caruurta yaryar ee raaca gaariga iyagoo isticmaalaya kuraasta caruurta ee horey u jeeda waxey qatar shan jibaar ah ugu jiraan iney dhintaan ama uu soo gaaro dhaawac culus marka la barbar dhigo caruuta isticmaasha kuraasta gaariga sii jeeda ee caruurta. Markaa waa in aad waqti hore aadan horey u soo jiidin ilmahaaga. Taladu waa in caruurtu sii jeedaan ilaa inti macquul ah oo qiyaastii inta ay ka gaarayaan afar sano.

### Barkimaha shilka waa qeyb ka mid ah nidaamka badbaadada gaariga


Barkimaha shilka iyo suunkuba waa nimaad badbaado wanaagsan oo gaariga. Laakin gaari ku wata booska rakaabka barkin shil oo shaqeyneysa waxey qatar galin kartaa ilmaha. Laakin barkimaha dhinacyadu iyagu qatar uma aha caruurta ku fadhida kursiga caruurta ee gaariga.

## Shaqada ka saar barkinta shilka ee kursiga rakaabka

Kuraasta caruurta gaariga ee sii jeedda iyo barkinta shilka ee booska rakaabka marka la wada isticmaalo waxey qatar galiyaan nolosha. Xooga soo saara barkinta shilka marka gawaari ay isku dhacaan waa mid weyn ee geysan kara halaag. Markaa waa in aan kursiga rakaabka marna loo isticmaalin difaaca caruurta (babyskydd), kursiga caruurta ee gaariga, kursiga suunka ama barkinta kursiga haddii kursiga rakaabku uu wato barkin shil oo shaqeyneysa. Waa in garaash ku takhasusay gaariga ka furaa barkinta shilka haddii aadan laheyn gaari aad adigu furaha shaqada uga saari karto barkinta shilka. Gawaarida qaar lagama furi karo barkimaha shilka. Marka caruurta dhererkooda gaaro 140 sintimitir ayaa la hubaa in ilmuhu isticmaali karo kursiga rakaabka ee wata barkinta shilka.

## Dooro wax shariciyeysan oo la tijaabiyey

La xiriir dukaan aad warbixin ka heleyso shaqaalo aqoon u leh oo kaa caawin kara kursiga iyadoo caruurta ee gaariga saaran tahay. Kursiga waa inuu u sharciyeysan yahay oo loo eegay ilmaha culeyskiisa. Ogoow iney jiraan kuraasta caruurta gaariga sii jeeda oo aan sharci u aheyn in loo isticmaalo kursiga danbe. Iska hubi in difaaca ilmaha (babyskydd), kursiga caruurta gaariga iyo barkinta suunka ay ogolaatay Yurub oo ay wataan calaamada E sida ay go'aamisay EG ama ECE-reglemente 44-03, iyo kuwo ka sii danbeeyey. Waxaa loola jeedaa in lambarka ogolaanshuhu ka bilowdo 03 ama 04. Kuraasta caruurta gaariga ee wata calaamada T lama isticmaali karo wixi ka danbeeya 9-ka meey 2008. (kuraasta caruurta gaariga ee sii jeeda qaarkood waxey wada wataan labada calaamo ee E iyo T.)




## Sharcigu muxuu leeyahay?

Iswiidhen waxa jira sharci sheegaya in dhamaan dadka raacaya gaari waa iney xirtaan suunka gaariga. Mida kale waa in caruurta ka gaaban 135 sintimitir ay isticmaalaan difaac qaas ah, difaaca ilmaha (babyskydd), kursiga caruurta gaariga, kursiga suunka ama barkinta suunka.

Caruurta ka yar sadax sano looma ogola iney raacaan gaari haddii ilmuhu aanu heleyn isticmaalka qalabka qaaska ah ee difaaca caruurta marka laga reebo marka ay safar gaaban ku raacayaan taksi. Haddii aad safar gaaban ku raaceyso taksi adigoo wada caruur taksiguna aanu laheyn qalabka qaaska ee difaaca, waa in ilmuhu fariistaa kuraasta danbe isticmaalaana suunka gaariga.

Dhamaan caruurta ka weyn sadax sano ee raacaya bas waa iney isticmaalaan suunka baska ama wixi kaloo difaaca ee jira. Wasaaradda gaadiidka waxey talo ku bixineysaa in caruurta dhamaan ay isticmaalaan suunka gaariga xataa caruurta da'doodu ka yar tahay sadax sano.

Laga bilaabo 1 juulaay 2006 lama ogola iney gaari raacaan dad ka badan inta loogu tala galay. Rakaabka gaariga waa in uu fariistaa meel loogu tala galay rakaab.

## Ka fikir ariman

- In qalabka loogu tala galay caruurta iyo gaariga.
- Iska tijaabi intaadan gadan.
- Raac waxa qoraalku ku amrayo.
- Hubi in ilmuhu fadhiyo meel badbaado ah iyagoo sax u xiran suunka gaariga intaadan shidin gaariga.
- Caruurta marna looma ogola iney fariistaan booska rakaabka oo ay ku xiran tahay barkin shil shaqeyneysa.
- Markaad taksi dalbaneyso u sheeg inaad u baahan tahay kursiga caruurta gaariga, kursiga suunka ama barkinta suunka.
- Qofka qaan gaarka ah ayaa mas'uulka ka ah in ilmaha gaariga isticmaalaan suunka ama wixi kaloo difaaca sida kursiga caruurta gaariga ama barkinta suunka.


WARNING
WARNING

# Difaaca caruurta

## Ilmaha dhasha ilaa ay ka gaaraan 9 bilood

Difaaca caruurta (babyskydd) waa badbaado wanagsan dhan kasta. Mar walbuu koro ilmuhu ugu badal mid la eg.

### Ildheeriya ku eeg markaa dooraneyso

Difaaca caruurta waa inuu noqdaa weynin ku filan ilmaha. Ilmuhu waa inuu ku nasan karaa isagoo heysta difaac madaxa oo dhan ah. Ogoow in firaashka caruurta iyo shabakada difaaca ee gaariga caruurta aysan aheyn difaac ku filan ilmaha. Haddii aadse doorato taa waa in ilmaha la dhigaa meel madaxu ku toosan yahay bartamaha gaariga. Difaaca ilmaha, firaashka (babybäddar) iyo shabakada difaaca ee gaariga caruurta waa iney noqdaan kuwo Yurub ogolaatay lehna calaamada E, warbixin intaa dheer ka aqriso qeybta ”Dooro wax shariciyeysan oo la tijaabiyey” ee bogga 8-aad.

### Kursiga hore mise kan danbe

Difaaca caruurta waa in la sii jeediyo meeshu doonaba ha yaale kursiga hore ama kan danbe. Qofka qaan gaarka ee kali ku ah gaariga waxa mar kasta u wanaagsan in ilmaha yar dhinaciisa joogo ee kursiga hore. Barkinta shilka ee booska rakaabka waa ineysan shaqeyneyn markaa. Haddii aad gaariga ku tihiin laba qof oo waaweyn waxa wanaagsan in ilmaha iyo hal qof oo weyn ay fariistaan kuraasta danbe.

### Suunka difaaca ayuu ku heynayaa booskiisa

Difaaca ilmaha waa inuu meel ku xajisan yahay. Wax badan ha foorarin. Ilmaha waxa meeshooda ku xajinaya suunka loogu tala galay difaaca ilmaha iyadoo difaaca laftirkiisa lagu xirayo suunka gaariga. Inta awoodaada ka fogee qeybta hore ee gaariga ama kursiga ka horeeya. Suunka gaariga ” miskaha” waxaa badanaa lagu soo jiidaa difaaca ilmaha iyo ilmaha markaas ayaa dadab loogu xiraa difaaca ilmaha. La soco iney jiraan noocyo badan oo kala duwan, raac qoraalka sida uu ku amrayo.

### Si gooni ah u kontorool in

- Ilmuhu isticmaalo suumanka la socda difaaca ilmaha.
- Suunka gaariga ee xajinaya difaaca ilmaha inuu la jiiday meeshi ugu danbeysay.
- Difaaca ilmaha waa ka koraan ilmaha marka madaxoodu kor uga soo baxo geeska.
- Caruur ma aha marna iney fariistaan booska rakaabka eey ku xiran tahay barkin shil oo shaqeyneysa. Takhasus aqoon u leh ha ka furo barkinta shilka haddii aadan laheyn gaari aad adigu furahaaga uga furi karto barkinta iney shaqeyso.

# Kursiga caruurta ee gaariga ee sii jeeda

## Laga bilaabo 7 bilood ilaa iyo 4 sano

Marka ilmuhu saani u fariisan karo isagoon meelna cuskan waa in aad markaa ka wareejisaa difaaca caruurta una wareejisaa kursiga caruurta ee gaariga oo sii jeeda. Waxaa loo xiraa sii jeed iyadoo lagu xirayo kursiga hore ama kan danbe. Kontorool in kursigu yahay mid loo ansixiyey in lagu xiro kursiga hore ama kan danbe. Ilmaha waxaa booska ku haya suunka loogu tala galay kursiga caruurta ee gaariga. Ogoow in qatar weyni ku jirto in ilmuhu dhaawac soo gaaro marka shil yimaado haddii ilmuhu ku fadhiyo kursi caruur gaari oo horey u sii jeeda.

### Raac qoraalka habka loo xirxiro

Kursiga sii jeeda waxa lagu xiraa musbaaro qaas ah. Suunka gaariga ayaa kaa caawinaya ku celinta booskiisa. Kursiga hore waa in kursigan badanaa u ku jarjeeraa meesha isteerigu ka soo jeedo (balsku uusan ku janjeerin muraayadda). Kuraaska caruurta ee gaariga ee loo isticmaalayo kursiga danbe waxaa badanaa caadi ah in kursigan leeyahay lug taal hoos uu ku tiirsan yahay. La soco iney jiraan noocyo badan oo kala duwan, raac qoraalka sida uu ku amrayo.

### Waqti hore ha jeedin caruurta

Caruurta waa iney sii jeedan inti macquul ah. Ilmuhu wuxuu kursiga ka korayaa marka madaxa uu heli waayo meel uu ku tiirasdo ama marka uu ka gudbo xadka culeyska. Markaa waxa laga yaabaa in aad u baahato in aad ku bedesho kursi ka weyn oo la sii jeedinayo. Kuraasta caruur ee gaari ee loo ogol yahay in kursiga hore lagu isticmaalo markaa sida caadiga ah waa in kursiga laga furaa suunka iyo waxyaabaha kale. Waxaa taa ka sii wanaagsan in la helo kursi suun ama barkin suun hagta suunka dhanka hoose ee miskaha iyo cajirka caruurta.

### Si wanaagsan u hubi in

- Kursiga caruurta gaarigu yahay mid Yurub ogoshahay oo leh calaamadda E, warbixin intaa dheer ka aqriso ”Dooro wax shariciyeysan oo la tijaabiyey” ee bogga 8-aad.
- Kursiga caruurta ee gaariga waxa badanaa lagu xiraa musbaaro qaas ah. Culeys saar kursiga oo xaji xariga si kursigu saani ugu fariisto.
- Ilmuhu waa inuu isticmaalaa suunka la socda kursiga caruurta ee gaariga. Kala jiid suunka. Hubi in suunka ”qeybta miskaha” aysan gaarin meel kore. Waa iney martaa cajirka ilmaha, oo aysan gaarin caloosha.
- Caruurta waa ineysan waligood fariisan booska rakaabka iyadoo ay ku xiran tahay barkinta shilka. U ogolaaw qof takhasus ku ah oo ka socda garaash si uu gaariga uga furo barkinta shilka haddii uusan gaarigaadu aheyn mid furaha looga furi karo barkinta.
- Haddii shaki kaaga jiro in kursigu yahay mid loo ogol yahay isticmaalka kursiga hore ama danbe, la xiriir meesha gaariga laga soo iibeyey.





# Kursiga suunka/barkinta

## Laga bilaabo 4 sano ilaa 10-12 sano

Dhaqaatiirta iyo cilmi baarayaashuba waxey ku taliyaan in caruurtu isticmaasho kursi suuna ama barkin suun ilaa ay ka gaaraan 10-12 sano. Ilaa iyo inta qalfoofka uu ka korayo waxa loo baahan yahay in ilmaha kor loo fariisiyo si suunku gaarigu u difaaco jirka. Sida sharcigu qabo dhamaan ilmaha ka gaaban 135 sintimitir waa iney isticmaalaan qalab difaac oo qaas ah, waxaa loola jeedaa difaaca caruurta, kursiga caruurta ee gaariga ama kursiga/barkinta suunka.

### Ku hagaaji suunka meel sax ah

Ka caawi caruurta kala bixinta suunka – qoorta u dhawee, lafta bogga kadibna hoos cajirka – ma aha dusha caloosha. Sida ugu jirka u xajisan yahay ayuu u difaacayaa caruurta. Ka fududee dharka sare ee culus kadibna suunka ku jiid ”miskaha” dharka hoostiisa.

### Kursiga suunka ama barkinta suunka

Farqiga u dhaxeeya kursiga suunka iyo barkinta suunka waa taageerada dhabarka. Haddii ilmuhu fadhiyo meel aan laheyn difaac madax waxa u wanaagsan markaa kursiga suunka. Kursigu wuxuu kaloo ka caawinayaa inuu ilmaha booskooda ku hayo marka ilmuhu seexdo.

### Shaqada ka saar barkinta shilka

Caruurta horey u jeeda ee fadhida kursiga caruurta ee gaariga ama kursiga suunka ama barkinta suunka waxey qatar ugu jiraan inuu dhaawac gaaro haddii ay ku safraan boos leh barkinta shilka oo shaqeyneysa. Marka ilmuhu gaaro dhirir ahaan 140 sintimitir ayaa ha marka ugu horeysa ee si badbaado ilmuhu u fariisan karo booska rakaabka ee barkinta shilku shaqeyneyso.

### Si gooni ah u kontorool in

- Suunka gaariga uu meeshooda ku celin karo ilmaha iyo kursiga ama barkinta. Suunka kala jiid.
- Ilmuhu uusan waligii suunka marin meel ka hooseeysa gacanta.
- Suunka uu ku fudud yahay qoorta agteeda.
- Hubi in uu san suunka ”miskihiisa” dhicin meel kore. Waa in uu maraa cajirka ilmaha dushiisa ee ma aha dusha caloosha.
- U ogoloow garaash takhasus ku ah gawaari noocaa in uu ka barkinta shilka shaqada ka saaro haddii aadan adigu aadan furahaada uga ugu saari karin shaqada barkinta.
- Kursiga suunka ama barkinta suunka waa iney noqdaan kuwo Yurub ogolaatay lehna calaamada E, warbixin intaa dheer ka aqriso qeybta ”Dooro wax shariciyeysan oo la tijaabiyey” ee bogga 8-aad.

# Su'aalo iyo jawaabo ku saabsan caruurta iyo gaari

### Caruurtu ma waxey fariisanayaan kursiga hore mise kan danbe?

Kursiga danbe ayaa sida sugan ugu badbaado badan – haddii la eego qatarta isku dhaca gaari oo kaliya. Taa ma quseyso caruurta sii jeeda ee xiran kuraasta caruurta ee gaariga. Haddii ayna shaqeyneyn barkinta shilka ma jiro farqi u dhaxeeya badbaadada isku dhac gawaari ee kursiga hore ama kan danbe. Haddana waa in la eegaa baahida ilmaha yar iyo dhowridiisa. Haddii aad tahay qof weyn oo kali ku ah gaariga waxaa ilmaha loo qaatay kursiga hore.

### Xagee gaariga ugu badbaado badan?

Booska dhexe ee kursiga gadaal ayaa ugu badbaado badan, waa haddii la heysto difaac madax iyo suunka sadaxda aag. Halkan ayaad ilmuhu ka fog yahay dhamaan aagaga isku dhaca.

### Xagee laga iibsan karaa kursiga caruur ee gaariga?

Dukaamada iibiya alaabada badbaadada caruurta iyo meelaha lagu iibiyo gawaarida. Iska hubi oo la hadal shaqaale aqoon u leh arintan.

### Kursigee ugu wanaagsan?

Ku tijaabo kursiga ilmaha iyo gaariga. Kursiga waa in loogu tala galay culeyska ilmaha, uusan ka weyneyn kana yareyn. Iibso kursi aad u taya badan lehna dhinacyo xoogan, kaasoo difaacaya caruurta marka gaariga dhinac looga dhaco.

### Sidee lagu garan karaa in kursiga caruurta ee gaariga yahay mid la ogol yahay?

Kursiga caruurta ee gaariga ama barkinta suunka waa in Yurub soo ogolaatay oo ay leeyihiin calaamada E sida sharciga EG qabo ama ECE sharcigeeda ee 44-03, ama mid ka danbeeyey. Waxaa loola jeedaa in lambarka ogolaanshuhu ka bilowdo 03 ama 04. Kuraasta caruurta gaariga ee wata calaamada T lama isticmaali karo wixi ka danbeeya 9-ka meey 2008. (kuraasta caruurta gaariga ee sii jeeda qaarkood waxey wada wataan labada calaamo ee E iyo T.)

### Sidee lagu ogaan karaa in kursiga sax loo xiray?

Noocyada kala duwan waxa loo xiraa si kala duwan. Iibso kursi aad heli karto warbixintiisa iyo gargaar ka imaanaya qof aqoon u leh. Raac waxa qoraalku ku farayo.

### Goormaa kursiga ilmuhu ka koraa?

Difaaca ilmaha ama kursiga caruurta ee gaariga wuxuu ilmuhu ka koraa marka madaxu aanu ku filneyn difaaca. Ilmuhu waa inuu u fadhiyo si nasasho leh, heystaa difaac madax isla markaana lugaha u heli karaa boos. Difaacu waa inuu ku quman yahay culeyska ilmaha.

## Goormaa ilmaha lagu bilaabi karaa in horey loo soo jeediyo?

Ilmuhu ha u sii jeedo gadaal ilaa iyo inti macquul ah (ugu yaraan inta uu ka gaarayo 4 sano). Madaxa ilmaha ayaa ka weyn kana culus marka loo eego jirka intiisa kale qoortuna si wanaagsan uma dhisna. Marka gaari shil galo waxa madaxa caruurta u duulaa horey iyo gadaal isagoo xoog weyn ku socda. Ku safrida gaari ilmaha sii jeeda waxey ilmaha siisaa difaac marka gawaari isku dhacaan.

## Xagee laga heli karaa kursiga caruurta naafada ah?

Caruurta qaar ee naafada ah ma isticmaali karaan qalabka caadiga ah ee lagu iibiyo suuqa. Waxey tan si gooni ah u saameyneysaa caruurta naafada oo dhaqdhaqaaqa dhibka ku qaba. Xarunta qalabka kala duwan iyo qolada habilitering-ka ayaa talo kaa siin kara kuraasta caruurta ee gaariga oo qaas ah ama qalab kale oo loo isticmaali karo fadhiga gaariga. Buugga ”Åka säkert – om trafiksäkerhet för barn med funktionshinder” ayaad ka dalban kartaa jaamacadda caafimaad ee Linköping, Statens väg- och transportforskningsinstitut (VTI), ama ururka wadaniga ee caruurta iyo dhalinyarada curyaanka ah ”Riksförbundet för rörelsehindrade barn och ungdomar (RBU)”.

## Kursi la soo isticmaalay, maxaa muhim ah in laga fakaro?

Kursiga waa inuu nabad qabaa. Kaa saar marada oo kontorool inuu yahay mid dhinac kasta ka dhan. Iyo inuu wato dhamaan qalabkiisi iyo qoraalka sida loo xero. Iska hubi in kursiga caruurta ee gaariga uu yahay mid Yurub ogoshahay lehna calaamada E iyo lambarka ogolaashaha oo ka bilowda 03 ama 04.

## Qofka uur leh maxaa loo baahan yahay inaan ku fakaro?

Isticmaal suunka gaariga, isagaa u wanaagsan hooyada iyo ilmaha caloosha ku jira. Suunka waxaa la mariyaa lafka bogga iyo caloosha hoosteeda ilaa iyo cajirka. Isku day inaadan gaari wadin mudada ugu danbeysa ee uurka. Isteeriga iyo barkinta shilka ayaa dhaawici kara ilmaha haddi shil uu dhaco. Waxa jira suuman qaas ah oo loogu tala galay dumarka uurka leh laakin ma keenayaan amaano badan balse waxay ku siinayaan nafis.

## Goormaa ilmuhu fariisan karaa meel ay ku xiran tahay barkinta shilka?

Waa in ilmuhu gaaraa 140 sintimitir dherer ahaan markaa waa hubaal in ilmuhu ku fariisan karo meesha leh barkin shil shaqeynaya.

## Barkinta shil ee dhinaca ma qatar bey u tahay caruurta?

Wey yar tahay qatarta ka iman karta in caruurta fadhida meesha saxda ah ee difaaca ilmaha ama kursiga caruurta gaariga ee sii jeeda ama dhaawac ka soo gaaro barkinta dhinaca.

### Si kale wax ma loo xalin karaa?

Laba caruur ma loo xiri karaa hal suun? Ilmaha jilibka malagu qaban karaa? Maya, sidaa looma xalin karo. Ilma kasta wuxuu u baahan yahay booskiisa, suunkiisa iyo qalabkiisa difaaca. Caruurna marna ma ah iney ku fariistaan jilibka dadka waaweyn marka gaari la raacayo.

### Maxaa la sameyn karaa marka ilmuhu diidu in meesha lagu xiro?

Istaaji gaariga oo u naso...

### Imisa ayaa lagu raaci karaa gaariga?

Laga bilaabo 1 juulaay 2006 lama ogola iney gaari raacaan dad ka badan inta loogu tala galay. Rakaabka gaariga waa inuu fariistaa meel loogu tala galay rakaab.



# Ku badbaadida gaariga – sidan ayaad u badbaadin kartaa adiga iyo ilmahaaga

✓ **Iska tijaabi intaadan gadan!**
Qalabku waa in uu sax ku yahay ilmaha iyo gaarigaba

✓ **Si sax ah u xir!**
Baro sida loo xiro loona isticmaalo kursiga caruurta ee gaariga. Raac waxa qoraalku ku farayo.

✓ **Waqti hore ha jeedin ilmaha!**
U ogoloow ilmahaaga inuu dib u sii jeedo inti suura gal ah, haddii ay socon karto intuu ka gaaro 4 sano.

✓ **Si wanaagsan u kontorool!**
Caruurtu waa iney si badbaadsan oo sax ugu fadhiyaan suunka gaariga isagoo meel saxa u jeeda intaadan kicin gaariga.

✓ **Barkinta shilka waa ineysan shaqeyn!**
Hubi ineysan shaqeyneyn barkinta shilka ee boosta rakaabka haddii ilmuhu fariisanayo kursiga hore.

Qoraalkan waa lacag la'aan waxaadna ka dalban kartaa wasaaradda gaadiidka (Trafikverket) telefoon 0243-755 00.

Ma dooneysaa warbixin intaa dheer? Nala soo xiriir.
Trafikverket: www.trafikverket.se

TRAFIKVERKET

Trafikverket, 781 89 Borlänge, Besöksadress: Rödavägen 1
Telefon : 0771-921 921, Texttelefon: 0243-750 90

www.trafikverket .se

TRAFIKVERKET BESTÄLLNINGSNR. 100492. DECEMBER 2011. PRODUKTION: HELIKOPTER BRAND DESIGN. FOTO: ULF PALM OCH TRAFIKVERKET. ILLUSTRATIONER: MARIA ERIKSSON. TRYCK: ÅTTA.45